## Su'aalaha codsiga Sannadlaha ah ee Neighborhood STAR 2026

KAHOR INTAADAN BILAABIN CODSIGAAGA, FADLAN XAQIIJI:

☐**Waxaan maalgalinta STAR u codsanayaa kaliya howlaha la ogolyahay (qeexid)**
☐**Hagaajinta maalgalinta loo codsaday cimrigeeda waxaa la filayaa inuu gaaro 7+ sanno**
☐**Ganacsigaygu ama ururkaygu waa mid si wnaaagsan ula shaqeeya Waaxda Gobolka Minnesota**
☐**Waan akhriyay waana fahmay Tilmaamaha Barnaamijka Neighborhood STAR**
☐**Waxaan haystaa qandaraas ama waxaan dhameystiray qandaraaskaygii maalgalinadii ay horey STAR ii siisay**

Su'aal walba waxay leedahay tiro xarfo go'an oo 2500 ah ama ka yar

**Codso Macluumaad**

1. Cadadka codsiga deeqda:

2. Ciwaanka/goobta meesha aad kasoo codsanayso maalgalinta (Ogsoonow: Waa inaad awood u yeelataa inaad muujiso maamulista goobta ciwaanada halkaan ku qoran. XOG CUSUB: Haddii hal mid ama ka badan oo dhinacyada ah ay ku yaalaan ciwaankaan aadna ahayn qofka iska leh, waa inaad keentaa cadaynta goobta aad maamusho iyo/ama oggolaansho qoraal ah oo aad kasoo qaadato mulkiilaha guriga taasoo ku saabsan hagaajinta aad soo jeedinayso, iyo sidoo kale cadaynta muujinaysa in dhinacyadu goobta ugu shaqeeyaan qaybo madaxbanaan, oo si fudud loo kala garan karo).

3. Qaybta/Degmada

4. Nooca Mashruuca:
   Dayactirka/Dib u habaynta – Ganacsi
   Dayactirka/Dib u habaynta - Deegaan
   Dhisme Cusub - Ganacsi
   Dhisme Cusub - Deegaan
   Horumarinta Bulshada (sida Hagaajinta kooban ee wadooyinka, garoomada cayaaraha, kuraasta jardiinada, astaamaha ama nalalka si loo hagaajiyo goobaha bulshadu isticmaasho)
   Hagaajinta Goobaha Barxadaha ah ee Gaarka loo Leeyahay (sida garoomada cayaaraha ama jardiinada bulshada ee ku yaala dhismaha gaarka loo leeyahay.)

Urur aan faa'iido doon ahayn oo ka dhisan xaafadda kaasoo hogaamiya barnaamij maah-hoosaad/deeq-hoosaad ah oo la siinayo ganacsiyada Saint Paul si raasamaalkooda loo hormariyo

5. Ka bixi faahfaahin kooban (1-3 jumladood ah) mashruuca aad doonayso in laguu maalgaliyo. Fadlan cadee horumarinta dhanka dhaqaalaha ah ee aad codsanayso in STAR kuu maalgaliso (sida, in la cusboonaysiiyo wajiga hore ee guriga ayadoo lagu xirayo 3 daaqadood oo cusub iyo albaabo cusub; in laga sameeyo wado la maro iyo calaamad dhismaha hortiisa). 400 oo xarfood

6. Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruucaaga, fadlan halkaan ku bixi.

7. Fadlan sheeg waqtiga u cayiman ee aad ku qiyaasayso iyo howlaha ku lugta-leh mashruucaaga. Maalgalinta Neighborhood STAR waxaa la isticmaali karaa kaliya marka maalgalinta ay ansixiyaan Duqa magaalada iyo Golaha Deegaanku, taasoo la filayo inay dhacdo xagaaga/horaanta dayrta 2026. Tusaale ahaan:
   Luuliyo-Ogoosto: Duminta qaybta baarkinada
   Sebteembar-Oktoobar: Laami cusub iyo baarkin
   Oktoobar-Noofambar: Astaan cusub oo lagu rakibaayo

8. Mashruucaagu ma yahay mid khuseeya Horumarinta Barxadaha Bulshada ka dhexeeya ama ma kuwa Gaarka loo leeyhaaybaa? Horumarinta Bulshada: Hagaajinta kooban ee wadooyinka, qalabka garoomada, kuraasta jardiinada, calaamadaha ama layrarka si loo hagaajiyo goobaha bulshadu isticmaasho.
   Hagaajinta Barxadaha Gaarka loo leeyahay: Garoomada cayaaraha ama beerta dadweynaha ee ku yaala guriga gaarka loo leeyahay.
   Haddii ay sidaas tahay, fadlan faahfaahi tirada qiyaasta goob-ta(baha) lagu samaynayo horumarinta iyo sida horumarintaas loo ilaalinayo 3+ sanno. Haddii qiimeynta ganacsiga ama dhismaha mulkiilaha guriga loogu baahdo horumarintaan darteed, fadlan faahfaahi qaabka aad u wajahayso mulkiileyaasha guryahaas.

9. Mashruucaagu ma kujiraa barnaamijka deeqaha hoose? Haddii ay sidaas tahay halkaan ku faahfaahi barnaamijkaaga.

Sidoo kale waa inaad kusoo lifaaqdaa tilmaamaha barnaamijka soo jeedintaada. Tilmaamaha waa inaad kusoo dartaa: tirada guryaha, ganacsiyada, ama ururada la caawinaayo; qaabka ka qaybqaateyaasha barnaamijka lagu xulanayo; in barnaamijka lala fulinaayo barnaamijyada kale ee magaalada; shuruudaha iyo xeerarka looga baahanyahay dadka daynta qaadanaya/kuwa daynta bixinaya; hanaanka qiimayta u qalmidda daynta,

haddii ay khusayso, iyo isudheelitirnaanta hadda, haddii ay jirto, abaalmarin maalgalin oo horey laguu siiyay.

**Ujeedada Bulshada:**
**Fadlan ogsoonoow sida mashruucaagu u buuxinayo mid kamid ah qaybaha ujeedooyinka bulshada ee hoose. Haddii aagu uusan khusayn mashruucaaga, waxaad ku dhaafi kartaa jawaabta oo banaan ama waxaad ku qori kartaa n/a.**

1. Fadlan qeex qaabka soo jeedintaadu u ilaalinayso ama u kordhinayso aasaasiyaadka canshuuraha Saint Paul (sida, canshuurta guryaha iyo/ama canshuurta iibka).

2. Fadlan sheeg tirada iyo mushaarka shaqada buuxda iyo tan gelinka ah ee cusub, haddii ay jirto, ee abuurmi doonta siina jiraysa shanta sanno ee soo socota taasoo ka dhalanaysa mashruucaan. Shaqooyinka waaraya waa kaliya shaqooyinka baaba'aya haddii aysan maalgalinta STAR helin.
   # Tirada Shaqooyinka cusub, joogtada ah oo wakhtiga buuxa leh:
   Celceliska mushaarka saacadii:
   #Tirada Shaqooyinka waaraya, joogtada ah oo wakhtiga buuxa leh:
   Celceliska mushaarka saacadii:
   #Tirada Shaqooyinka cusub, joogtada ah oo gelinka ah:
   Celceliska mushaarka saacadii:
   #Tirada shaqada sii socota, joogtada ah oo gelinka ah:
   Celceliska mushaarka saacadii:

3. Soojeedintaadu ma ku samaynaysaa dib u habayn wajhaada hore ee guriga ee banaan? Haddii ay sidaas tahay, halkaan nagula wadaag tafaasiisha ku saabsan.

4. Haddii ay khusayso, fadlan faahfaahi sida mashruucaaga u ilaalinayo hawlaha cimilada, waaritaanka, iyo/ama adkaysiga sida ku cad Qorshaha Howlaha Cimilada iyo Adkaysiga ee Saint Paul.

5. Haddii ay ku khusayso, fadlan faahfaahi qaabka mashruucaagu uga qaybqaadanayo, ugu dabaaldagayo, ama u xoojinayo kala duwanaanshaha dhaqamada St. Paul.

6. Haddii ay ku khusayso, fadlan faahfaahi qaabka mashruucaagu usii wadayo sinaanta, lagu qeexay xaqiijinta in fursadaha waxbarashada, shaqada, guriyaynta, caafimaadka, iyo badqabka si siman loo qaybsado; in dhamaan dadka deegaanku helaan helitaanka adeega oo ah mid wakhtiyaysan oo khuseeya, adeegyada, caawimaada, iyo fursad, iyo in isirka, nooca jinsiga, rabitaanka nooca galmada,

luuqadda, qolada, wadanka uu qofku kasoo jeedo, xaalada naafanimada, da'da, ama furaha deegaanku aysan go'aamin karin diidini karin ama xadidi karin fursadda qofku ku gaari karo ka faa'iidaysiga awoodihiisa.

**Baahida Bulshada:**

1. Faahfaahi sida mashruucaagu u buuxinayo baahida ka jirta xaafadda ama wax uga qabanayo yoolasha xaafadda (sida, qaabka mashruucaagu u waafaqsanyahay Qorshaha Goobta Yar ee xaafadaha?).

2. Faahfaahi qaabka aad soojeedintaada ugu darayso aragtida bulshada marka aad diyaarinayso (sida, wadashaqayn ama taageero aad ka helayso golaha degmadaada ama kooxda xaafadda).

**Awoodda**

1. Fadlan faahfaahi ururkaaga iyo awoodda ururkaagu u leeyahay sameynta mashruuca aad soojeedisay ee codsigaaga kujira.

2. Yuu noqon doona maamulaha mashruuca u xilsaaran? Fadlan faahfaahi taariikhda, xirfadaha, iyo waaya-aragnimada uu u leeyahay maamulista mashaariic kan lamid ah.

**Macluumaadka Miisaaniyadda:**

1. Barnaamijka Neighborhood STAR waxaa loogu talagalay inuu maalgalin siiyo mashaariicda qiimaha leh laakiin lacagtu ku yartahay kuwaasoo aan la fulin karin maalgalintaan dheeraadka ah la'aanteed. Fadlan faahfaahi baahida aad u qabto maalgalinta STAR.

2. Waa maxay **wadarta guud** ee kharashka mashruucaaga? Haddii wadarta guud ee kharashkaagu ka badan tahay codsigaaga deeqda STAR, fadlan qor ilaha dheeraadka ah ee maalgalinta ee aad u isticmaali doonto fulinta mashruucaaga.

3. Fadlan qor maalgalin kasta oo horey Magaaladu kuu siisay adigoo ku daraya magaca mashruuca, sannadka, isha/barnaamijka, cadadka aad qaadatay, iyo wax kasta oo ah baaqi kasoo haray oo aad qaadatay (adigoo ku daraya STAR), ama aad

hadda doonayso in mashruucaan laguugu siiyo.

4. XOG CUSUB: Ma tahay ama ma ahayd (marka lagu daro shirkadaada iyo/ama qolooyin adiga ku khuseeya) mid waligiis uu xiriir xun oo dhanka daymaha ah dhex maray Magaalada? Haddii ay sidaas tahay, fadlan faahfaahi.

**Foomamka Miisaaniyadda**: Fadan qor dhamaanba ilaha iyo meelaha aad u isticmaashay maalgalinta, oo ay kujirto maalgalinta STAR, ee mashruuca oo dhan. Kusoo lifaaq dhamaanba qiyaasta qandaraaslaha iyo agabyada kaabaya mar kasta oo ay ku khusayso. Wadar gaaraysa ilaa 20% oo maalgalinta STAR ah ayaa loo isticmaali karaa La wareegidda iyo/ama Kharashaadka Tooska ah ee Mashruuca.

**Isha (Dakhliga Mashruuca)**

| **Isha** | **Cadadaka** | **Isha** | **Rahman ama La helay?** | **Wadarta** |
|---|---|---|---|---|
| Cadadka la codsaday ee Neighborhood STAR | | Neighborhood STAR | Rahman | **$** |
| Maalgalinta Kale ee Magaalada | | | | **$** |
| Maalgalinta Kale ee Dowladda | | | | **$** |
| Maalgalinta Gaarka ah | | | | **$** |
| Shaqo Aad Mulkiilo u Tahay/ama Shaqaale Mutadawac ah | | | | **$** |
| Mid kale (fadlan faahfaahi) | | | | **$** |
| | | | **Wadarta Ilaha Mashruuca:** | **$** |
| Haddii loo baahdo iswaafajinta mashruucaan, ishee(ilahee) iyo cadadkee(yadee) loo isticmaali doonaa waafajinta maalgalinta?<br>Isha (ilaha):<br>Cadadka(yada): | | | | |

***Qeexitaano:***
Maalgalinada Kale ee Magaalada: Maalagalin dheeraad ah oo ka imaanaysa Magaalada St. Pau.; i.e., CDBG, TIF, CIB, HRA
Maalgalinada Kale ee Dowladda: Maalagalinada gobolka, ismaamulka ama federaalka
Maalgalinta Gaarka loo leeyahay: deeqaha gaarka ah, daymaha, sadaqooyinka, ama qaaraanka qofku bixiyo
Shaqo Aad Mulkiilo u Tahay: Shaqaalaha mutadawaca ah ee hagaajinaya qiimaha dhismaha, lagu qiimeeyay $15 halkii saac.
Maalgalinta Iswaafajinta: Qaaraanka doolar ilaa doolarka ah ee loogu talagalay maalgalinada kale ee aysan magaaladu bixin sida ay waajibinayaan hagitaanada STAR. Ilaa 30% iswaafajinta loo baahan yahay waxay noqon kartaa qaaraan aan toos ahayn oo ay ku jirto adeegyada iyo badeecadaha gudaha, shaqaalaha mutadawacnimada ah, iyo/ama sinaanta shaqada.

## Isticmaalka (Kharashaadka Mashruuca)

| **Isticmaalka** | **Cadadka Maalgalinta STAR ee la isticmaalay** | **Cadadka Maalgalinta aan STAR ahayn ee la isticmaalay** | **Wadarta** |
|---|---|---|---|
| La wareegidda | | | $ |
| Dayactirka/Dib u habaynta – Ganacsi | | | $ |
| Dayactirka/Dib u habaynta – Deegaan | | | $ |
| Dhisme Cusub – Ganacsi | | | $ |
| Dhisme Cusub – Deegaan | | | $ |
| Horumarinta Bulshada | | | $ |
| Horumarinta Goobaha Barxadaha ah ee Gaarka loo Leeyahay | | | $ |
| Kharashaadka Tooska ah ee Mashruuca – fadlan qor (ku lifaaq dukumiinti dheeraad ah hadii loo baahdo) | 1<br>2.<br>3. | 1<br>2.<br>3. | $ |
| **Wadarta Isticmaalka Mashruuca:** | **Wadarta STAR: $** | **Wadarta Aan STAR ahayn: $** | **$** |

***Qeexitaanada***:
<u>Helitaanka</u>: Iibsashada guryaha ama dhismaha horey u jiray
<u>Ganacsi/Deegaan-Dayactir/Dib u habayn</u>: Hagaajinta dhismeyaasha jira ama goobta
<u>Ganacsi/Deegaan-Dhisme Cusub</u>: Waxyaabaha dheeraadka ah, dhisidda qaab cusub ama goob
<u>Hagaajinta Goobaha bulshada</u>: Hagaajinta yaryar ee wadooyinka, qalabka garoomada, kuraasta jardiinada, calaamadaha ama layrarka si loo hagaajiyo goobaha bulshadu isticmaasho
<u>Hagaajinta Barxadaha Gaarka loo leeyahay</u>: Garoomada cayaaraha ama jardiinada bulshada ee dhismaha gaarka loo leeyahay
<u>Kharashaadka Tooska ah ee Mashruuca</u>: Kharashaadka fudud ee mashruuca la xiriira. Maalgalinta STAR **waxaa** loo isticmaali karaa dhismeyaasha guryaha, injineeriyadda, sharciga, iyo kharashaadka daynta, maaraynta mashruuca, ogolaanshaha, iyo shatiyada. **Maalgalinta aan STAR ahayn waa** in loo isticmaalaa mushaaraadka guud, maamulka, suuqgaynta, ama ku shaqaynta kharashaadka mashruucaan kujira.

**Su'aalaha Guud ee Mutadawacnimada ah**: Macluumaadkaan waxaa loo isticmaali doonaa ujeedooyinka kasoo warbixinta oo kaliya loomana isticmaali doono in lagu gaaro go'aano maalgalin. Waxay ka caawinaysa Magaalada inay ogaato inaan gaarayno bulshada oo dhan. Haddii aad doorbidayso inaadan ka jawaabin su'aalahaan, fadlan ku qor N/A goobta jawaabta ee hoose.

1. Ma yahay qofka leh mulkiyadda, maamula, ama hogaaminaya ugu yaraan 51% ganacsiga ama ururka isku sheegaya inay xubin ka yihiin mid kamid ah kooxaha soo socda? (dooro dhamaan inta ku khusaysa)
☐Isir ahaan ama qolo ahaan laga tiro badanyahay
☐Halyey ciidamada ah
☐Qof qaba hal naafo ama ka badan
☐Dadyowga ku nool saboolnimo ama wajahaya dakhli yari
☐Qof wajahaya hoy la'aan
☐Dumar
☐Nin
☐Qof jinsigiisa badalay
☐ Aan jinsi lahayn
☐ Jinsi kale
☐ LGBQ+
☐ Mid kale (fadlan cadee)

2. Haddii aad u dooratay "jinsi kale" su'aasha 1aad, fadlan cadee. Haddii aysan ku khusayn ama aad doorbidayso inaadan shaacin, fadlan ku qor N/A qaybta jawaabta.

3. Sidee isla mulkiilaha koowaad ama maamulaha howluhu isku tilmaamaama qolo ahaan ama isir ahaan? (dooro dhammaan meelaha ku khuseeya)
☐Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska
☐Aasiyaan
☐Madow ama Afrikaanka Maraykanka ah
☐Hispanic ama Latino Asal ah
☐Hawai ama Pacific Islander Dhalad ah
☐Cadaan

☐Waxaan doorbidayaa inaanan ka jawaabin
☐Mid kale (fadlan cadee)

4. Haddii aad u dooratay "jinsi kale" su'aasha 3aad, fadlan cadee. Haddii aysan ku khusayn ama aad doorbidayso inaadan shaacin, fadlan ku qor N/A qaybta jawaabta.

5. Ganacsigaaga ama ururkaagu ma yahay mid ugu yaraan 51% ay leedahay hal qof ama ka badan oo dumar ah (ama macluumaadka u qoran ee ganacsiga leh dartiis, ugu yaraan 51% alaabta ay leedahay hal qof ama ka badan oo dumar ah) maamulka iyo shaqooyinka ururka/ganacsigana ma maamulaa hal qof ama ka badan oo dumar ah?
☐Haa
☐Maya
☐Waxaan doorbidayaa in aanan sheegin

6. Ganacsigaaga ama ururkaagu ma yahay mid ugu yaraan 51% ay leedahay hal qof ama ka badan oo dumar ah (ama macluumaadka u qoran ee ganacsiga leh dartiis, ugu yaraan 51% alaabta uu leeyahay hal qof ama ka badan oo BIPOC ah) maamulka iyo shaqooyinka ururka/ganacsigana ma maamulaa hal qof ama ka badan oo dadka BIPOC ah?
☐Haa
☐Maya
☐Waxaan doorbidayaa in aanan sheegin

7. Ganacsigaagu ma yahay mid shahaado ka haysta CERT?
☐Haa
☐Maya
☐Waxaan doorbidayaa in aanan sheegin

8. Ilaa goorma ayaad lahayd/ku shaqaynaysay ganacsigaan ama ururkaan?

9. Ganacsigaaga ama ururkaagu ma yahay ganacsi ama urur yar sida ku qeexan ganacsi ama urur oo ka yar $1 milyan iibkiisa/dakhligiisa guud ama leh shaqaale joogto ah oo ka yar 20 qof (MN Statute 645.445).
9a. Haddii ay haa tahay, imisa shaqaale oo joogto u dhiganta (FTE) ayaad leedahay? (FTE waa shaqaalaha shaqeeya ugu yaraan 32 saacadood todobaadkii. Fadlan haku darin qandaraasleyaasha ama mutadawiciinta).

10. Waa maxay nooca ganacsiga ama ururka aad haysato?
☐Maqaaxi/Cuntada Fudud
☐Cunto/Bakhaar
☐Tafaariiq/Dharka/Hadiyadaha
☐Adeegyada shakhsiga/Timo jare/Saaloon
☐Madadaalo

☐Adeegyada Xirfadaha
☐Warshadaha/Waxsoosaarka
☐Teknoolojiyadda
☐Daryeelka Caafimaadka
☐Wax kale

11. Haddii aad uga jawaabtay "wax kale" su'aasha 10 aad, fadlan cadee ama ku qor N/A haddii aad doorbidayso inaadan sheegin macluumaadkaan.

12. Sidee ku maqashay fursadda codsashada maalgalinta STAR?
☐Xubin Golaha deegaanka ah
☐Golaha Degmada
☐Shaqaalaha Magaalada
☐Iimaylka Magaalada
☐Baraha Bulshada
☐Guddiga Dhaqaalaha
☐Saaxiib ama xubin qoyska ah
☐Mid kale

13. Haddii aad uga jawaabtay "wax kale" su'aasha 12 aad, fadlan cadee ama ku qor N/A haddii aad doorbidayso inaadan sheegin macluumaadkaan.

14. Koodhka NAICS. Ku qor N/A haddii aadan aqoon.

**Lifaaqyada: Tilmaamaha**
Haddii aadan awoodin inaad keento wax kamid ah dukumiintiyada lagaa codsaday, fadlan soo gali dukumiinti sharaxaya sababta aadan u awoodin inaad keento dukumiintiga lagaa doonayay. Inaad dukumiinti banaan oo aan sharaxaad wadan soo gudbiso ama aad soo qorto "waxaan soo gudbin doonaa markii la i weydiiyo" lagaama aqbalayo codsigaagana waxaa loo arkayaa midaan dhamaystirnayn. Macluumaad dheeraad ah ayay shaqaalaha magaaladu ku weydiin karaan marka ay eegayaan soojeedintaada.

Lifaaqyada lagaaga baahan yahay:
1. Qiraalka Foomka Hogaansamidda
2. Cadaynta Maamulista Goobta (Sabarloogada, Heshiiska Iibka, Xulashada Iibka, Kiraysi Shaqaynaya oo 3+ sanno ah, Heshiiska Kirada oo 3+ sanno ah).
3. Cadaynta in ganacsiga ama ururku si fiican ula shaqaynayo Xoghayaha Gobolka Minnesota
4. Qiyaasta Qandaraaslaha/Adeeg bixiyaha
5. Canshuur celinta labadii sanno ee lasoo dhaafay ama dhaqaalaha la tafaftiray; ganacsiyada bilowga ah, waxaa lagu badali karaa qorshaha ganacsiga
6. Sawirka goobta mashruuca/adeega aad soo jeedinayso
7. Tilmaamaha Barnaamijka Deeqaha hoose/Daymaha Hoose

Lifaaqyada Aan Lagaaga Baahnayn:
1. Siyaasadda Danaha Isdiidaya
2. Waraaqaha Talo soojeedinaada ama Taageerada
3. Hanaanka Saadaasha Mashruuca, waraaqda xisaab-xirka, ama warbixin-howleedka
4. Macluumaadka maareeyaha mashruuca iyo maamulka kale ee muhiimka ah
5. Cadaynta ilaha dheeraadka ah ee maalgalinta haddii ay khusayso (sida, waraaqaha heshiiska bangiga ama Mu'asasada)

**Ogaysiiska Xeerka/ Tennessen ee Qarsoonaanta Xogta ee Minnesota**: *Magaaladu waxay ku weydiinaysaa inaad keento macluumaad kala duwan oo ku saabsan dhaqaalaha, ganacsiga iyo mid kuu gaar ah aadna ku qorto codsigaan. Macluumaadka aad bixiso waxaa lagu maamulayaa Xeerka Maamulka Xogaha ee Dowladda Minnesota ("Act") kaasoo maamulaya ururinta, samaynta, kaydinta, ilaalinta, iyo baahinta macluumaadkaaga. Waajib kuguma ahan inaad bixiso macluumaadkaan, laakiin haddii aad bixin weydo macluumaadka lagu weydiiyo uma qalmi doontid deeqda barnaamijkaan. Macluumaadka aad bixiso waxaa heli doona shaqaalaha Magaalada iyo qandaraasleyaasha u baahan si ay ugu isticmaalaan maamulka iyo maaraynta barnaamijka iyo sidoo kale dadka kale sida ay ogolyihiin Xeerka iyo sharciga ama awoodda garsoorku.*